



Renting in Seattle **KIRAYSTE AHAAN**

Guri kiraysiga ayaa noqon kara hawl dhib badan waxaana jiro macluumaad aad ubadan oo aad ubaahantahay inaad ka ogaato xaquuqaha iyo waajibaadka kiraystayaashaada. Buuggaan macluumaadka ayaa tusaale kaasiinaysa codsiyada dayactirka, guriyaynta macquulka ah, qarashaadka guriyaynta kukordha, iyo noocyada kale ee ogaysiisyada ee kaasoo gaari kara mulkiilaha guriggaaga.

Booqo www.seattle.gov/rentinginseattle ama wac **Renting in Seattle (Guri kiraynta Magaalada Seattle)** Lankeeda caawinta adoo kawacaya (206) 684-5700.



City of Seattle
Somali

*Way fiicnayd
saaka, laakiin way
dilaacsanayd markaan
gurigga imid...*



Codsiyada Dayactirka

- Islamarkaba usheeg mulkiilaha gurigaad dagantahay marka dayactir loobaahanyahay. Mararka qaar, inaad soosheegi waydo dayactir loobaahanyahay waxay keenaysaa inaad masuul kanoqoto cilada dhacday aadna dhiibto qarashaadka dayactirka. Tuubooyinka dilaaca ama biyaha musqusha kadareeraaya waxay siiwayn usaamayn karaan qarashka biyaha kaaga baxa. Mulkiilahaaga gurigga ayaa kudoodi kara inaad cilada masuul katahay haddii aadan islamarkaba soosheegin.
- Waxaa qasab ah inaad codsigaaga dayactirka kudirto qoraal ahaan. Mulkiilaha gurigaagu waa inuu kasoojawaabaa codsiga asagoo kusiinaaya waqtii go'an oo ladayactiraayo ayadoo hadba kuxiran nooca dayactirka.
- Wac laynta Renting in Seattle Helpline hadii mulkiilahaaga gurigu kuusoo jawaabi waayo. Kormeere ayaa kuuqabanaaya jadwal kormeer lagu samaynaayo kana codsanayaa mulkiilahaaga gurigu inuu saxo wixii khalad ah oo xeerka uu kagalay.
- Inaad kirada bixin wayso sababo laxariira dayactiro ama inaad jarato qarashaad dayactir kaaga baxaaya waxay kugu keeni kartaa in guri lagaa saaro haddii aadan horay uhaysan heshis oo qoraal oo aad lagashay mulkiilaha gurigaaga.

Hellitaanka Mulkiilaha guriggaaga

- Mulkiilaha gurigaagu wuxuu xaq uleeyahay inuu gurigaaga soogalo sababo qaas ah awgood asagoo kusoo ogaysiinaaya xili hore.
- Maalinta 1aad** ayaa loobaahanyahay marka mulkiilaha gurigga si uu utuso guriga qof raba inuu kiraysto ama iibsado, ama kunturaadle si uu uga qiyas qaato.
- Maalinta 2aad** ayaa loobaahanyahay marka mulkiilaha gurigu uu ubaahanyahay inuu sameeyo dayactirada ama cusboonaysiinta muhiimka ah ama lagu heshiiyay.
- Waxaad udiidi kartaa inuu gurigaaga soogalo haddii aad haysato sabab rasmi ah sida inuu khilaafay jadwalka kuudagsan laakiin waa inaad xaqiijisaa inaad siiso xiliyo kale oo aad firaqo leedahay.
- Sharciga ayaa ubaahan in labadiinuba adigga iyo mulkiilaha gurigaad dagantahay aad qaab macquul ah uwajaahdaan galitaanka mulkiilaha ee gurigaaga.
- Dukumiinti gali dadaalkaaga si aad uraacdo codsiga mulkiilahaaga ee galitaanka gurigga. Haddii aad markasta udiido mulkiilahaaga inuu guriga soogalo, waxaa lagusiinayaa ogaysiis 10 maalmood ku eg oo laguugo sheegaayo inaad xeerka Raacdo ama Guurto.
- Mulkiilaha gurigaaga ayaa soogali kara gurigaaga ayadoon wax ogaysiis ah ama ogolaansho ah lagaa qaadan markay jirto xaalad degdeg ah, sida dab ama dilaac wayn oo biyaha kudhaca.



Kor ukaca Qarashaadka Kirada

Qarashaadka gurigga waxaa kujira lacagta kirada, qarashaadka baakinka/kaydka ama qarashaad kasta oo joogto ah oo laxariira guriyayntaada.

- Magaalada Seattle, qarashaadka guriga kubaxa ee kordha 10% ama kabadan waxay ubaañiyihii ogaysiis hore oo qoran laguna soogudbiyo 60 maalmood kahor dhaqangalkooda. Kororka qarashaadka ee kayar 10% waxay ubaañiyihii 30 maalmood oo ogaysiis hore oo qoran ah.
- Ogaysiis yada waa inay kujiraan macluumaa laxariira xaqquqaha kiraystaha ayna buuxshaan shuruudaha xeerarka Magaalada iyo gobalka labadaba.
- Haddii xaaladaha guriga aad kiraysatay aysan buuxin shuruudaha aasaasiga ah ee kuqoran liiska kujira barta www.seattle.gov/rio, mulkiilaha guriga aad kiraysatay waxaa qasab ku ah inuu dayactiro ciladaha jira kahor intaan lacagta kirada lakordin.
- Waxaa qasab ah inaad qoraal ahaan ugu sheegto mulkiilaha gurigga cilada jirta kahor intaan kordhinta kiradu dhaqangalin. Magaaladu waxay samaynaysaa kormeer si looxaqijiyo jiritaanka cilada iyo/ama dayactirkeeda. Wac laynKa Renting in Seattle Helpline si aad jadwal uqabsato.



Ogaysiis yada kale ee Muhiimka ah

Dareen buuxa sii markaad ogaysiis kahesho mulkiilaha gurigga. Waxaa suurtagal ah inay waqtii kooban ku egtahay waxayna ubadan tahay inay kujiraan macluumaa muhiim ah. Mulkiilaha gurigaaga ayay tahay inuu iskudayo inuu ogaysiiska kuukeeno haddii aadan joogin, wuxuu kuusoo dhigi karaa albaabka ama wuxuu kuugusoo diri karaa boostadaada rasmiga ah.

- Ogaysiiska 30 maalmood ee Quran oo kusaabsan Isbadelka Heshiiska Kirada:** Markaad kirada bil-bil ubixinayso, mulkiilahaaga ayaa badeli kara shuruudaha heshiiskiina kirada asagoo ogaysiis qoran kusiinaayo 30 maalmood kahor intuusan isbadelka samayn. Waxaa qasab ah in ogaysiiska waafaqo xiliga dhamaadka kirada.
- Ogaysiiska 10 maalin ee Raacida amarka ama Guurista:** Ogaysiiskaan wuxuu laxariiraa jabinta heshiiskaaga kirada. Tusaalayaal badan waxaa kujiri kara buuq aad samayso inta lagu jiro saacadaha nasashada ama inaad sigaar kucabto meelaha aan sigaarka loo ogolayn. Haddii aadan raacin awaamiirta, waxaad halis ugalaysaa in gurigga lagaa saaro. Haddii aad dood kakeento jiritaanka xaqqiqa ah inaad buuq samaysay, waa muhiim inaad jawaabtaada qoraal kusoo gudbisaa.
- Ogaysiiska 3 maalin ee Bixi ama Guur:** Ogaysiiskaan wuxuu laxariiraa soodaahida kirada. Waaad kudhii kartaa lacagta kirada saddex maalin gudahood marka ogaysiiska kusoogaaro ama waxaad halis ugalaysaa in gurigga lagaa saaro. Haddii aad rajaynayo inaad kiradaada bixiso xili danbe, waxaa fiican inaad ogaysiis hore siiso mulkiilaha gurigaaga. Waxaa suurtagal ah in mulkiilaha gurigaagu fursad kusiiyo, gaar ahaana haddii aad inta badan kiradaada dhiibto xiliga loogu talagalay (hoos kafiiri balanqaadyada caawimaada kirada ee hoos kuqoran).
- Ogaysiiska joojinta:** Haddii aad ogaysiis kahesho mulkiilaha gurigaaga kaasoo uu kaaga dalbanaayo inaad gurigga kaguuro, booqo barta www.seattle.gov/rentinginseattle ama akhri Buugga Macluumaa kirada hoosna kafiiri balanqaadyada caawimaada kirada ee hoos kuqoran.

Haddii aad ubaahantahay in caawimaad lagaa siiyo fahanka ogaysiis laguusoo diray ama aad ubaahantahay in laguu gudbiyo meel aad talo sharci kahesho, laxariir LaynKa Renting in Seattle Helpline.

Balanqaadyada Caawimaada Kirada

Haddii aad rabto in ay gacan kusiiso caawimaada kiradu wac laynka Macluumaa kirada Bulshada oo ah 211 si aad uga hesho liiska wakaaladaha kucaawin kara.

Haddii aad hesho ogaysiiska kiro bixinta ee 3 da maalin ama aad guurto haddii aad bixin waydo aadna caawimaad dhagaale oo amaan ah kahesho qolo sadexaad, mulkiilaha gurigu waa inuu aqbalaa balanqaadka qarash bixinta ee qoran. Qoloda sadexaad aaya noqon karta kaniisad, haayad khayri ah ama shaqsii.

- Balanqaadku waa inuu noqdaa mid qoran.
- Waa inaad gudbisaa 3 maalin kahor intaan muddada ogaysiiska dhicin.
- Qoloda sadexaad waa inay dhab katahay bixinta lacagta ay balan qaadeen muddo shan maalmood ah gudahood.
- Qarashka labixinaayo waa inay tahay mid ku filan kirada kaligeed ama marka lacag kale laguugu kordhiyo.

Balanqaadka
Ogaysiiska 3 da Maalin



Waqtigisu koobayahay



Guriyaynta Macquulka ah iyo Dayactirka

Haddii aad kiraysanayso gurigga adoo naafo ah waxaad codsan kartaa guri kugu habboon ama in waxlaga badalo gurigga.

- Caawimaad guri waa in wax laga badalo xeerarka ama talaaboooyinka laraaco sida in lagaa dhaafu xeer jira oo laxariira baakinka guriga si laguugu ogolaado meel baakin oo gurigaaga udhaw, haddii naafonimadaadu saamayn kuleedahay socodkaaga.
- Waxkabadalida gurigu caadiyan waa kaalmaati jir ahaan oo kuusahlaya galitaanka guriga, sida gacanka aad cuskanayso ama jidka gaariga curyaanka. Waaad masuul kanoqonaysaa qarashka kubaxaaya isbadaladaas ilaa in mulkiiluhu qarashaad kahelo mooyee dawlada Federaalka ah.

Difaaca Kiraystaha


- Waa sharci daro in mulkiilahaagu uu kaa aargoosto sababo laxariira inaad udagaasho xaquuqdaada, aad cabasho kagudbisay takoor laguu gaystay, hawla gurigaaga ama mulkiilahaaga. Kor uqaadista kirada, hoos udhigida adeegyada, ama inuu iskudayo inuu gurigga kaasaaro ayaa ah qaar kamid ah tusaalayaasha ugu badan ee aangoosiga noqon kara.
- Kiraystayaashu waxay xaq uleeyihiin inay wax abaabulaan sida qabashada kulano, qaybinta waraaqo ogaysiis ama inay xariir layeeshaan kiraystayaasha kale ee dhismaha dagan si ay uga doodaan arimaha kirada.
- Mulkiilahaaga waxaa si adag looga xarimay inuu badelo qufulada, uu damiyo adeegyada, oo bixyo albaabada/daaqadaha, qalabka, ama tuubooyinka.



City of Seattle

Seattle.gov/rentinginseattle

Laynka gurmadka (206) 684-5700



Magalaada Seattle waxay aaminsantahay iskudhafnaanta iyo sinaanta dadka. Dadka soogalootiga ah iyo qaxootiyaasha waa lagusoo dhawaynayaa magaaladaan. Shaqaalaha magaaladu dadka mawaydiyaan sharcigooda muwaadnimada waxayna ushaqeeyaan dhamaan dadka dagan magaalada ayadoon loofiirnayn inay soogalooti yihiin iyo inkale.

Haddii aad tahay qof naafo ah aadna doonayso inaan maclumaa kugu siino qaab kale fadlan soowac laynkeena gurmadka. Laynkeena TTY (Dadka Dhagaha La') waa (206) 233-7156.

Adeegyada turjumaanka ayaa markasta diyaar ah. Dukumiintigaan waxaad kuhelaysaa luuqadaha:
 English • Español • Oromiffa • af-Soomaali • አማርኛ • ສාමාජික • 中文 • 한국어 • ພາສາລາວ
 русский язык • ភាសាអីណី • ከኢትዮጵያ • Tiếng Việt